

# COVID-19:

## Caymiska Ganacsiga iyo Munaasabadaha

### Xogta caymiska ee ganacsiyada

Ganacsatada gobalka Washington waxay caadiyan iibsadaan caymis si ay ganacsigooda uga difaacaan khasaaro ku imaan karta. Hadda oo uu dilaacay fayriska coronavirus (COVID-19), mulkiilayaasha ganacsiga ayaa su'aal ka keeni kara in caymiskoodii horay u jiri jiray uu daboolaaayo khasaarada noocan ah.

### Waxa ay tahay in laga siiyo daboolid caymis

Si lagaaga daboolo khasaaroyin kasta oo ganacsi sababo la xariira xanuun faafa, sida COVID-19, waxaad u baahan tahay inaad iibsato qayb cusub oo lagusoo daro caymiskaaga.

La xariir wakaaladaada caymiska ama shirkada caymiska si toos ah si aad u ogaato inaad caymiskaan dheeraad ah horay u lahayd iyo in kale. Haddii aadan haysan caymis dheeraad ah aadna dooneyso inaad iibsato, la xariir wakiilkaaga ama shirkadaada caymiska si aad u hubiso in la heli karo.

Haddii aadan iibsan caymiska dheeraadka ah ka hor intaan xanuunku qarxin aadna doonayso inaad iibsato, shirkada caymiska ayaa diidi karta inay caymiska kaa gado.

### Dhacdada joojinta caymiska

Goobaha munaasabada ayaa caadiyan u baahan qofka ama shirkada jadwalka munaasabada codsanaysa inay haysato caymiska daboolaaaya qarashka joojinta munaasabada. Caymiska xanuunada faafa ee dilaaca ayaa caadiyan aan ku jirin xeerka caymiska caadiga ah ee daboolo joojinta munaasad la qorsheeyay. Caymiska noocan ah waxa uu daboolaa noocyadaan dhacdooyinka ah:

- Cimilada xumaata
- Falalka argagixisada
- Masiibooyinka dabiiciga ah
- Ku guul daraysiga guurista
- Khilaafaadka shaqaalaha
- Soo xaadiris la'aanta

### Waxa ay tahay in laga siiyo daboolid caymis

Waxaad iibsan kartaa caymiska dheeraadka ah ee joojinta munaasabada si aad u daboolo qarashka joojinta munaasabada sabab la xariirta cudurka faafa ee dilaacay. Haddii aan shirkadaada caymisku daboolin caymiskaan dheeraadka ah, waa inaad ka iibsataa shirkadaha kale ee caymiska.

Ka feejignoow in haddii aadan iibsan caymiska dheeraadka ah ka hor intaan xanuunku qarxin aadna doonayso inaad joojiso munaasabada, shirkada caymisku dib uma celin karto taariikhda caymiska si ay caymis uga bixiso joojinta. Shirkadaha caymiska ayaa sidoo kale dooni kara inay iibiyaan caymiska dheeraadka ah ee noocan ah.

**OGSOONOOW:** Office of the Insurance Commissioner (Xafiiska Gudoomiyaha Caymiska) awood uma lahan inuu ku qasbo shirkadaha caymiska inay iibiyaan caymis nooc gaar ah ama heshiis gaar ah oo la siiyo macamiisha.

Ma qabtaa su'aalo la xariira  
caymiska?  
[www.insurance.wa.gov](http://www.insurance.wa.gov)  
1-800-562-6900



[facebook.com/wsoic](https://facebook.com/wsoic)



[twitter.com/WA\\_OIC](https://twitter.com/WA_OIC)



[medium.com/commissioners-eye-on-insurance](https://medium.com/commissioners-eye-on-insurance)

